

WAXYEELADU WAA KHALAD

luqad walba

ABUSE IS WRONG IN ANY LANGUAGE

La maltraitance est inacceptable peu importe la langue

El abuso es condenable en cualquier idioma

Жестокое обращение недопустимо на любом языке

학대는 언어를 막론하고 그릇된 것입니다

بدسلوکی کسی بھی زبان میں غلط ہے

بد رفتاری در هر زبان غلط است

தர்ப்பிரயோகம் என்பது எந்த மொழியிலும் தவறுதான்

إساءة المعاملة مرفوضة في جميع اللغات

虐待是有悖文明的恶行

ਦੁਰਵਿਵਹਾਰ ਕਿਸੇ ਵੀ ਭਾਸ਼ਾ ਵਿੱਚ ਗਲਤ ਹੈ।



Caddaalada Canada “Justice Canada” waxay mahadnaq weyn u celinaysaa Shield of Athena oo qayb weyn ka qaadatay buugan hirgalintiisa.

Buuggani waa daabacaado xiriir ah oo ku saabsan Waxbarashada Sharciga Dadweynaha iyo Macluumaadka oo loo soo saaray Qorsha Rabshadaha Qoyska ee Wasaaradda Caddaaladda Canada. Daabacadaha kale ee ka midka ah buuggaagtan xiriirka ah waxay kala yihiin:

- *Waxyeeladu waa Khalad*
- *Waxyeelada Carruurta waa Khalad: Maxaan Samayn Karaa?*
- *Waxyeelada Waayeelku waa Khalad*

Si aad daabacaadahani uga fiirsato internet-ka, fadlan booqo waxaad tuujisaa magaca daabacaada meesha ay ku qoran tahay “Search”.

© Boqorada Sharafta leh ee Sharciga ah ee Canada, oo ay wakiil ka yihiin Wasaaradda Caddaalada iyo Qareenka Guud ee Canada, 2012-
Qareenka Guud ee Canada, 2012-ka

ISBN 978-0-662-03670-8

Buug No. J2-131/2012So-PDF

Aussi offert en français sous le titre :

La maltraitance est inacceptable peu importe la langue

Oggolaanshaha dib u soo daabicida

Macluumaadka ay ka kooban tahay daabacaadani ama qoraalkani waxaa suurta gal ah in dib loo soo daabici karo, isagoo qayb ahaana ama dhamaystiran, waxay doontaba ha ahaadaane, si shakhsi iyo si dadweynaba iyadoo ayna ujeedadiisu ahayn ka ganacsi ahaan, iyada oo aan wax lacag ah la iska qaadayn ama oggolaansho dheeraada la iswaydiinaynin, ilaa siyaabo kale loo tilmaamo maahee.

Waxaa lagu waydiistay inaad:

- Taxadir muujiso adigoo hubinaya sax sanaanta waxyaalaha dib loo soo daabacay;
- Tilmaanto cinwaanka oo dhamaystiran iyo waxyaalaha dib loo soo daabacay labadoodaba, iyo sidoo kale ururka qoray; iyo
- Tilmaanto in dib u soo daabicidu ay tahay nuqulka qoraal ee asalka ahaa ee ay soo daabacday Dawladda Canada iyadoo dib u soo daabicida aanan la soo saarin iyadoo ay wax xiriir ah la leedahay, ama ay taageertay Dawladda Canada.

Dib u soo daabicida ganacsiga looga danleeyahay iyo qaybinta lama oggola iyadoo qoraal oggolaansho ah laga haysto maamulaha xuquuqda lahaanshaha Dawladda Canada, Hawlaha Dadwaynaha iyo Addeegyada Dawladda Canada (PWGSC) maahee. Wixii macluumaad dheeraad ah, fadlan kala xiriir PWGSC telefanka: 613-996-6886 ama email-ka droitdauteur.copyright@tpsgc.pwgsc.gc.ca.

(Somali)

Buuga waxa ku qoran

- ▶ Qofka akhrisanaya (2)
- ▶ Waa maxay waxyeelayntu? (4)
 - ▶ Jirdilka (7)
 - ▶ waxyeelada nafta (15)
 - ▶ Waxyeelada dareenka (19)
 - ▶ Waxyeelada dhaqaalaha (23)
 - ▶ Ogaanshiyo darro (24)
- ▶ Cadaawad qof aad isku dhowdiihin (25)
 - ▶ Waxyeelada waayeelka (27)
 - ▶ Waxyeelada dhallaanka (30)
- ▶ Ma joogtaa mise waad baxdaa? (34)
 - ▶ Ayaa ku caawin kara?(41)
- ▶ Maxaa dhacaya haddii aad booliiska wacdid? (46)
 - ▶ Erayada buuggan ku qoran (48)
 - ▶ Xusuus (54)

Qofka Akhrinaya Buuggan

Buuggan waxaa ku qoran macluumaad ku saabsan waxyeelada qoyska. Waxa kale oo ku qoran siyaabo ama wadiiqooyin mucaawino lagu heli karo.

Waxyeelada qoysku waxay ka dhexdhaci kartaa qoys kasta iyo reer kasta. Waxay ka dhexdhacdaa dad Kanada u dhashay iyo dad aan u dhalanba. Waxay ka dhexdhacdaa dad wayeel ah iyo dad dhalinyarba. Waxay ka dhexdhacdaa dad isku dhow* iyo waalid iyo ilmihis. Inay adiga kugu dhacdo ayaa dhicikarta.

Dasanila qoysku waa inay noqoto mid amni ah. Dadka qoyska ahi waa inay isqadarin iyo isxushmayn ku wada dhaqmaan. Qof waliba qadarin ayuu mudanyahay rag, dumar, carruur, iyo waayeelba. Waxyeelada qoysku waa waxaan la qaadankarin.

Waxa dhicikarta haddii dalka Kanada aad ku cusubtahay in aanad hubin waxa sharcigu yahay ama xuquuqdaadu tahay, ama aanad garanayn halka aad mucaawino ka helikartid. Haddii aad Kanada ku cusubtahay waxa dhicikarta inaad dhibaatooyin badan oo caadi ah sida dhaqan kugu cusub* aad la kulantid. Waxa dhicikarta reerkaagii iyo asxaabtaadi inaad u darsatid oo aad dareentid inaad keligaa tahay. Waxa dhicikarta in aadan luqadda lagaga hadlo dalkan xoog u aqoon. Sidaa daraadeed waxa dhicikarta in ay adkaato in aad caawimo raadsato ama aad la kulantid cid aad aaminikartid.

Arag: Erayada lagu suntay calaamaddan (*) waxaa lugu macnaynayaa buugga gadaashiisa. Waxaanay hoos yimaadaan:
Erayada ama cibaarooyinka buuggan ku qoran

Waa lugu sheegay: Fadlan waxaad ogaataa in buuggan macluumaadka ku qorani aanay sharci ahayn. Macluumaad guud ayaa ku qoran. Haddii aad u baahantahay talo gaar ah, waxaa habboon inaad la tashatid qof qanuun yaqaan ah.

Buuggan waxaa loogu talagalay dadka ku cusub dalka Kanada lana arko in ay ku noolyihiin nolol waxyeelo ku jirto. Buuggani waxa kale oo uu gargaarikaraa cid aad aqoon u leedahay oo ku nool waxyeelo, haddii aad u gudbisid macluamadka ku ku qoran.

Haddii waxyeelo ku haysato, gargaar codso. Waxaa jira dad badan oo gacan ku siinkara. Xaqaaga weeyaan inaad nabadgalyo ku noolaatid. Ogowna keli ma tihid.



Waxyeelo maxay tahay?

Waxyeelo qoys waxay dhacdaa marka qof reerka ka mid ahi ama qof aad isku dhowdhiin uu dhaawac ku gaarsiiyo. Dhaawacaasi wuxuu noqonkaraa Mid jirka ah, mid galmo ah ama mid dhaqaale ah. Waxaa kale oo waxyeelo ah ogaanshiyodarrada.

Waxyeelada qaarkeed waa danbi, sida waxyeelada jidhka ama weerarka galmada. Kuwaasi waxaa weeye danbi ciqaab leh.* Waxyeelooyin kale sida afxumada ama caydu ma ah danbi laakiin wali qofka way xanuujinayaan. Haddii aan wax laga qabana waxa dhicikarta in ay sii xeeldheeraato oo ay isu baddasho wax intaa ka wayn.

Waxyeelada qoysku waa haddii ninkaaga ama xaaskaaga ama qof aa wada socotaan oo wax idinka dhexeeyaan uu dhibaato kuu gaysto. Sidaa oo kale haddii waalidkaa, ilmahaaga, walaashaa, walaalkaa, ama qof aad xidid tihiin ama aad si kale wax isugu tihiin haddii uu dhib kuu gayso waa waxyeelo qoys.

Cimri kasta iyo diin kasta oo ay dadku yihiin waxyeeladu way ku dhici kartaa. Cilmi kasta iyo xoolo kasta oo dadku leeyihiin waxyeeladu way ku dhici kartaa. Inkasta oo ay waxyeeladu ku dhici karto rag, dumar, gabdho, iyo wiilalba, haddana waxay waxyeelada ugu badani ama ugu xumi ku dhacdaa dumarka. Khaas ahaan waxyeelada jidhka iyo cawrada.

Haddii ay kadis tahay Waxaad wacdaa 9-1-1

Waxaad u carrartaa dibbadda is ay dadku kuu arkaan, haddii uu guduhu kuu ammaan badan yahayna gurigaaga ku jir. Qayli darisku si uu kuu maqlo oo ay askarta kuugu yeedhaan

Haddii waxyeelo ku haysato waxa dhici karta in aad baqatid, xishootid, ama aad kali ahaan dareentid. Waxaa la arkaa inaad isu qaadatid inaad adigu masuul ka tahay dhibta. Waxaad ogaataa in qofka waxyeelada geysanaya uu masuul ka yahay waxa uu ku kacayo.

Xadgudubka iyo xumayntu waxa weeye wax uu qofku doorto inuu ku kaco, laakiin waa doorasho aad u xun.


Maxaad yeelaysaa haddii waxyeelo ku haysato?

Waxaa dhici karta in aadan jeclaysan in aad reerkaaga dad kale kala sheekaysato oo aad ka falanqooto dhibaatooyinka idin dhexyaal. Waxa dhici karta inaad u aragtid waxa idin dhexyaal arin khaas ah oo aan cidna lala wadaagi karin. Hasayeeshee dalka Kanada bulshada ayaa waxyeelada ka soo horjeedda waayo cawaaqib xun ayay gaysataa khaas ahaan caruurta.

Haddii waxyeelo ku haysato, taageero ama taakulayn raadso. Waxa aad u sheegtaa dhibta ku haysata dhakhtarkaaga, kalkaaliyahaaga caafimaad, samafalaha ku qaabilsan, macalinkaaga, booliiska , ama cid aad ku kalsoontahay. Haddii ilmahaaga waxyeelo haysato ama uu arkaayo adiga oo wax lagu yeelayo, waxaa habboon in aad ogaysiiso booliiska ama *qolada caruurta ilaalisa**.

Sinnaanta dhaddig iyo laboodka

Dalka Kanada ragga iyo dumarku way siman yihiin sharciga hortiiisa. Waa in isku si loo la dhaqmaa markay shaqaynayaan. Sidoo kale ninku kuma dirqiyo karo gabadha in ay guriga ku xidhnaato umana diidi karo in ay dugsi dhigato ama ay booqato reerkeeda ama asxaabteeda.



Haddii aan cidi ku caawimin way adag tahay inaad waxyeelada kali ahaan ka baxid. Waxaa laga yabaa inaad ku tiirsan tahay qofka wax ku yeelaya, ama aad wali jeceshahay oo aad u malaysid qofku inuu kuu baahanyahay. Reerkaaga ayaa la arkaa inay kugu dirqiyaan inaad reerka magaciisa ama sharaftiisa dhawrtid. Sidaa daraadeed aad is tidhaahtid waa wajibkayga inaan qofkan la noolado. Waxaa kale oo dhici karta qofka wax ku yeelaya inuu ku cabsiiyo oo uu kaa dhaadhiciyo in ay tagistu kasii xun tahay inaad la joogtid. Ama ay ballan ku qaadaan in ay wax ka baddalayaan dhaqankooda.

Waxyeeladu ma wax caadi ah baa?

Waxyeelo ma laha cilaacadaha caafimaadka qabaa. Isxushmayn iyo isqadarin ayay ku wada dhaqmaan dadku. Waxa dhici karta qofka wax ku yeelayaa inuu dhib badan qabo, oo uu isku buuqsan yahay laakiin taasi u saamixi mayso in uu wax ku yeelo. Maxaa yeelay waxa jira siyaabo badan oo wax loo xaallin karo. Waxaa ka mid ah inaad caawimo ka raadsatid qof aad ku kalsoon tahay, khaas ahaan imaamkaaga ama samafalaha cidda. Waxaa dhici karta qofka wax ku yeelayaa inuu ku jecelyahay adiguna aad jeceshahay laakiin waxyeelayn ma dhexmari karto dad isku qoys ah oo isku dhow.

Qofka wax ku yeelayaa waa inuu ogaadaa in ay waxyeeladu noqon karto danbi ciqaab leh oo hoos yimaada *Criminal Code**, lagana yaabo in booliisku ku qaadi karo danbi ciqaab leh.

Waaxyaha hoos ku yaalaa waxay sharxayaan noocyada kala duwan ee waxyeelada.

Waxyeelada jidhka



“waa inaad caawimo raadsataa.



Arintani waay kasii daraysaa”

Makhsinka emerjensiga ee cosbitaalka ayay Lena la fadhiisatay gargaare bulsho iyo turjubaan. Waxay isku dayday inay is dejiso oo ay cabsida iska biiso. Gacanteedii jabtayna dhinaceeda ayay sidaa u dhigtay. Markaas ayay gargaaredii bulsho tidhi “waxay aniga ila tahay inaad booliiska arintan u sheegtid”. Lena way yara gilgilatay markaas ayay tidhi “maya, booliiska maya!” Inta ay naf is yara galisay ayay tidhi “ si kale waa inay jirtaa.” Markay booliiska soo hadalqaaday ayuu jidhkeeda sidaa u wada dubaaxiyey. Waxa ay xasuusatay dhibaatooyinkii ay askartu ka gaysatay magaaladii ay joogi jirtay – dhimashadii, dhaawicii, hooggii, dhacii, iyo kufsigii. Lena iyo ninkeeda, George, dalka Kanada ayay yimaadeen iyaga oo rajaynaya inay ilaawaan shilkii soo maray. Laakiin way ka carari kari wayeen xasustii shilkii ay soo mareen taasina waxay ka dhabqisay nololshii cusbayd ee ay isla haayeen bilaaba. Gaar ahaan George, way ku adkaatay inuu dadka heshiis la noqdo. Taasi waxay keentay inuu shaqo

haysan kari waayo. Markaa wuu isku buuqay dabadeed cadhadii ayuu kula dhacaa Lena marka ay ku tidhaahdo xumaanta jooji oo is deji. Marmarka qaarkood gacan ayuu ula tagay. Taas oo korkeeda ka muuqatay, markaa ayey derisku arkeen oo ay kula taliyeen in ay iskaga tagto ninkeeda. Laakiin iyadu ninkeeda way ka naxaysay markaa waxay tidhi “George waqti adag ayaa haya”. Markan laakiin derisku wuxuu arkay in Lena gacani jaban tahay markaa waxay ku adkaysay inay cosbitaalka u kaxayso. Waxay ku tidhi “waa inaad caawimo raadsataa. Arintani way kasii daraysaa.” Isla markaa tacsii ayey ugu yeedhay. Lena waxa ay xasuusatay arintii jaarku ku tidhi markaasay u jeedsatay gargaaredii bulsho, oo ay waydiisay “aniga iyo ninkayga dhibaato badan ayaa na soo martay. Mala heli karaa si looga horjoogsado sida uu u dhaqmayo?” gargaaredii bulsho ayaa garabka ayay u salaaxday Lena markaas ayay tidhi “ Waxaan kuu raadinaynaa cid dhibta ku haysata fahmi karta oo ku caawisa.”

Sidee buu u eg yahay?

Waxyeelada jidhku, oo uu ku jiro *weerarku*,* waxa weeye marka qof ku isticmaalo xoog qofka kale isaga oon *ka ogolaan**. Waxa dhicikarta in any qofka gaadhsiiso xanuun ama dhaawac aanu qofku ka bogsan muddo dheer.

Waxyeelada jidhka waxaa ka mid ah:

- Riixidda ama tukhaantukhynta
- Wax ku dhufashada, dharbaaxada, ama haraatida
- Qanjiidhada ama feedka
- Ceejista
- Dooxidda ama jeexidda
- Toogashada
- Halgaadda
- Gubidda
- In qofka la qabto si uu qof kale u weeraro
- In qofka makhsin lugu qafilo ama la xidhxidho
- In qofka qudha laga jaro

Arimahaas oo idili waa danbi ciqaableh dalkan Kanada.

Booliisku aad ayuu uga feejigan yahay waxyeelada jidhka. Haddii danbi lagu qaado qofka wax ku yeelaya, ciqaabtu aad ayay u weyn tahay. Waxyeelada jidhka waad u sheegi kartaa booliiska markastaba xataa haddii ay muddo badani kasoo wareegtay. Laakiin waxa fiican in la ogaysiiyo askarta sida ugu dhaqsaha badan ee suuragal ah.

Hadii ubadka waxyeelo jidh la gaadsiiyo isagoo guriigiisa ku nool, qoloda caruurta ilaalisa ayaa arinta soo dhexgalaysa oo ilmaha kaxaynaysa.



Waxyeelada u dhacda sharaf/magac dhawr

Waxyeelada ka kacda “sharaf dhawr” waxa ay dhacdaa marka ay reerku doorbidaan inay xoog isticmaalan si ay magaca ama sharafta reerka u ilaaliyaan. Sida ay u badan tahay qofka la dhaawacayaa waa gabadh reerku isleeyahay magaciinii ayay xumaynaysaa. Waxa ka mid ah waxa reerku diidan yahay:

- Inay gabadhu rag la haasaawdo
- Inay gabadhu xidhiidh galmo la yeelato nin aan qabin
- Inay gashato dhar waalidka la xun
- Inay diido guur reerku u gartay

Reerku waxay qabaan in gabadha waxyeelo la gaadhsiiyaa ay reerka magaciisa iyo sharaftiisa soo celinayso.

Waxyeelooyinka reerku gaysankaro waxaa ka mid ah:

- Dilmada
- In la xidho gabadha
- In la cabsiiyo gabadha
- In lagula taliyo inay is disho
- In qudha laga jaro

Waxyaabahaas oo dhami waa danbi ciqaab leh.

Haddii aad taqaanid qof nabadgelyadiisa u baqaya, booliiska la xidhiidh.

Guur Khasab ah



“waxaan yeelo garan maayo, waxay ii noqotay inaan reerkayga iyo mustaqbalkayga kala doorto.”



Nathalie iyadoo rundudda ayay dhabanada qabsatay. Waxay dareentay sidii ay riyo xun ku dhex jirto. Saxiibadeed Christine ayaa dabadeed ku tidhi “jidhkaagu wuu gariirayaa”. Nathalie way faraxday markii ay saxaabi-deed Christine telefonka ka qabatay oo ay ka ogolaatay inay kulu kulanto beerta. Markii ay isu yimaadeen ayay Nathalie waxkasta u sheegtay Christine. Waxay u sheegtay in reerkeedu ay nin ay u guuriyaan u heleen, ninkaas oo jooga dalkii ay ka yimaadeen. Waxay kale oo ay u sheegtay in reerkeedu ka filayo inay ogolaato guurkaa loo gartay, sidii hooya-deed u ogolayd. Christine ayaa intay yaabtay tidhi “sideebay sidaa kuugu gali karaan?” Buundo fiican ayaad iskuulka ka keentay! Weyna ogyihiin inaad ischoolka dhawaan dhammayn doonto oo aad doonayso inaad jaamacad gashid!” Nathalie intay hogatay oo ay dhulka ku dhaygagtay ayey tidhi “haaheey, waan u sheegay kun goor. Waxa uun u cad in aan u baahanahay in aan guursado. Waxaan anigu rabaa waxba lama aha.” Waxaa dhacday inay reerkii oo dhami isugu yimaadeen xafalad. Adeerkeed, ayeydeed, walaasheed, walaalkeed

iyo waalidkeed. Markaa aabihii wuxu ku dhawaaqay inay dalkoodii booqa-nayaan isla markaana in Natalie nin loo helay oo guurin doono. Markii ay cabatayna adeerkeed wuxuu ku yidhi sidaa laguugu taliyay ayaad yeelaysaa. Hooyadeedna markii ay bariday way iska sii jeedsatay oo wax ay ku hadasho ayay garanweydey. Nathalie waxay tidhi “ waxaan yeelo garan maayo, waxay ii noqotay inaan reerkayga iyo mustaqb-alkayga kala doorto. Cabsi badan ayaa i haysa.” Intaa ka dib saaxiibteed ayay ku jeedsatay markaas ayay tidhi “ Maxaa dhacaya haddaan iska diido ninka ay ii guurinayaan? Ama haddii uu i kufsado? Reerkani miyaanay waxba danba ka la-hayn?” Christine way kacday markaas ayay Nathalie gacanta qabatay oo ay ku tidhi “Ina keen, haddii aad rabtid annaga nala joog ayaamo. Hooya-day waan la hadlay intaan kuu iman oo waxay tidhi waxay kuu gaynkartaa qof yaqaana qaanuunka oo kula taliya. Qanuunka ayay ka soo horjeeddaa in qof lugu dirqiyo inuu guursado. Waxaad u baahan tahay inaad caawimo raadsato oo aad naftaadana badbaadiso.”

Guurka dirqiga ahi wuxuu dhacaa marka qofku ama laba qofba aanay ogolayn guurka. Guurka dirqiga ahi waa ka jaad ka dadka laysu diyaariyo. Guurka la diyaariyo labada qofba waa ka raali guurka. Guurka dirqiga ah waxa la arkaa qof ama labada qofba inay diidan yihiin.

Laakiin reeruhu ay khasab isugu guuriyaan. Waxa dhici karta in reeruhu isticmaalan muquunin, ama afduub ama inay qofka meel ku xidhaan oo ay dareenkiisa waxyeelo u gaystaan. Waa danbi ciqaab leh in waalidku ilmaha ku dirqiyo guur xitaa hadday is leeyihiin ilmaha ayay dantiisu ku jirtaa.

Waxa laga yabaa in carruurta lagu dirqiyo guur aanay rabin. Waxa dhacda mararka qaarkood in ilmaha madrasadda laga bixiyo si loogu guuriyo.

Haddii aad taqaanid cid guur lugu dirqiyayo, booliiska ogaysii. Haddii aad ka shakisan tahay in qof dalka laga saarayo si loogu guuriyana booliiska ogaysii.



Gudniinka Hablaha

Gudniinka habluha waxa uu dhacaa marka gabadha yar dhaawac la gaarsiiyo. Taas oo dhacda marka qaar ama dhammaan cawradeeda la jaro iyadoo aan caafimaadkeedu ku xidhnayn. Gabadha yar faa'iido cafimaad ugu ma jirto in jidhkeeda la jarjaro. Waxayna u keenaysaa xanuun badan iyo dhibaatooyin laga yaabo inay la kulanto mustaqbalka. Gudniinku waa danbi ciqaab leh dalka Kanada.

Qofkii caawiya qofkii gabadh yar gudayana wuxuu galayaa danbi ciqaab leh. Waxa ka mid ah dadkaa dhaqtarka, kalkaaliyaha caafimaad iyo waalidkaba. In dalka ilmaha laga saaro si loo soo gudona waa danbi ciqaab leh.

Gudistu waa waxyeelo gabadha yar loo gaysanayo markaa waa in dowladda la ogaysiiyaa.

Haddii ilmo aad garanayso aad uga cabsoonaysid in lala damacsan yahay in la gudo, booliiska gaadhsii.

Waxyeelada Galmada



*“Intaa wixii ka dambeeyey xoog ayay
oga cadhootay oo indhihiina way
siin kariwaday.”*



Mercedes baskii ayay la socotay iyada oo isku buuqsan. Dalka waxay ku noolayd lix bilood markaa wali aad umay kala baran. Darsigii luqadda ee ay maanta qaadatay waxa ay kasoo maqashay arrin ka nixisay. Carl dalka Kanada wuxuu u soo guuray dhowr sano ka hor. Mar uu reerkiisii soo booqday ayay kulmeen markaas ayay si dhaqso leh isu guursadeen. Markii hore way is yaqaaneen wax badan oo isku mid ahna nolosha way ka soo mareen. Laakiin in badan bay soo kala maqnaayeen intii uu waraaqaha u hagaajinayey. Ugu dambayntii markii ay timid, waxay timid iyaga oo kala raagay oo is ilaaway. Waxay bilowday in ay ka qalooto reerkeediina ay u darsato. Waxay noqotay kali oo afla'aan iyo aqoon la'aan ayaa ciishay. Markaa Carl way nacday oo inuu usoo dhawaado way diiday. Markii hore dul buu u lahaa laakiin bilo markii ay kasoo wareegeen isaguna wuu cadhooday oo wuxuu ku dirqiyey in uu u galmoodo iyada oo aan ka raali ahayn.

Dhowr habeen ka dibna wuu isku dayey inuu u soo dhawaado laakiin waxay ka codsatay inuu iska daayo. Dhag umuu dhigin ee hawshii halkii ayuu ka watay. Intaa wixii ka dambeeyey xoog ayay uga cadhootay oo indhaha way siin kari waday. Maanta darsigii ay soo qaadatay waxay ka soo baratay in galmada dirqiga ahi ay tahay danbi ciqaab leh markastaba, xitaa hadday dadku is qabaan. Waxay ku tashatay in ay wax ka qabato arinkaa oo aan dib danbe loogu dirqiyin wax aanay u diyaar ahayn. Waxay ku tashatay inay macallimmadeeda waydiiso cid caawin karta.



Sidee ayey u egtahay?

Waxyeelada galmada waxaa ka mid ah:

- in qofka la taabto ama la salaaxo isaga oo aan ka raali ahayn
- in laga joogsan waayo qofka marka uu yidhaahdo iga joogso
- in lagu dirqiyo qofka inuu sameeyo wax aanu ogolyn

Galmada aanu qofku ogolayn waa danbi ciqaab leh*. Waxa ka mid ah taabashada ama in qofka xoog loogu dirqiyo in loo galmoodo, waxa mid ah dadka xaaska ah, qof aa wada nooshihiin ama aad wada socotaan oo aa waqti wada qaadanaysaan. Xataa qofka aa is qabtaan kuma dirqiyo kartid haddii aanu doonayn.

Waxa jira qaanuun ubadka/carruurta loogu talogaly inuu ka badbaadiyo faraxumaynta dadka waaweyn. Farxumaynta carruurta kuma koobna jidhkooda taabashadiisa kaliya. Waxa kale oo faroxumayn ah marka qofka wayni uu:

- ilmaha kala hadlo wax aan habboonayn
- ama inuu ilmo sawiro ama daawado isagoo ka faa'iidayanaya

Faraxumaynta ilmaha waxa ka mid ah oo kale:

- in ilmo 16 jir ka yar qof weyni xidhiidh galmo la yeesho
- in qof weyni xidhiidh galmo la yeesho qof u dhaxeeya 16 iyo 18 jir hadaanu ilmuhu ogolaan.
- in loo galmooda oo laga faa'iidaysto ilmo 18 jir ka yar

Dalkan Kanada, waa danbi ciqaab leh in qof weyni uu u galmoodo ilmo 16 jir ka yar. 16 jir waa da'da qanuunka Kanada sharciyeey in ay dadka ku heshiin karaan inay isu galmoon karaan. Haddii ay labada qof da'doodi isu dhowdahay laakiin sharcigu waa cafiya karaa.

Carruurta 18 jir ka yar sharcigu uma ogala in ay yeelan wax galmo ku saabsan oo iyaga lagu xumeeyo. Waxa ka mid ah in ilmaha la galiyo waxyaabo lacag laga sameeyo. Ama qof ilmaha ka sareeyo oo uu ku kalsoon yahay uu la yeesho cilaaqad galmo. Dadkaa waxaa ka mid ah waalidka, walaal ka weyn, macallin ama qof ilmaha tababara.

Haddii ilmaha gurigiisa lugu faroxumeeyo, waxa dhici karta in qoloda carruurta ilaalisaa ilmaha gurigiisa ka kaxayso, oo ilmaha waalidkii laga qaado.

Waxyeelada Dareenka



*“Waxa uu go’aansaday in aanu sidan ku
noolankarin markaa uu u baahanyahay inuu
cid mucaawino siisa raadsado.”*

Harvey gabadhiisii yarayday ayuu hanta uu sare uu qaaday ilmadii ka masaxay. Maktabadda ayuu geeyey isaga oo is leh marka aad buug u akhridid ayay is dajin doontaa oo aad adiguna shaqo taada ka wanaagsan raadsandoontaa. Habeen waliba marka uu guriga yimaado wuxu u yimaadaa xaaskiisa oo cadhaysan oo qaylinaysa. In badan ayuu adkaystay oo uu is lahaa way ka soo raynaysaa. Wuxuu iska ilaalinayay in uu cadhoodo oo uu carruurtiisa hortooda ka qayliyo. Laakin qayladii badnayd dareenkiisa wax weyn bay yeeshay calool xanuun ayeyna ku ridday. Harvey iyo xaaskiisu dalkoodii ayey isku barteen waxaanay wadaageen himilo badan iyo rajo wayn. Waxay rajaynayeen nolol cusub oo ay carruurtoodu tacliin wacan iyo shaqo wacan helaan. Hasa yeeshee markii ay dalka soo dageen himiladoodii ma anaay suurtoobin. Taasina Maria ayey niyad jab ku riday markaas ayey bilowday in ay isaga canaan iyo cay oogada uga tuurto. Gurigoodiina dab

ayey ku oogtay, caruurta hortooda ayay odaygeedii ku cayday oo ay ku canaanatay. Caawase wixiiba way kasii dartay. Waxay ku tidhi “ doqon caajis ah ayaad tahay, shaqo aan kuu qalmin ayaad haysataa, waxbana kuma wanaagsanid. Nin naf leh ma tihide malaha waxaa ila gudboon in aan caruurta kaxaysto oo aan dalkii kula noqda, aabahay baa na hayndoona e.” Intaa kadib saxankii ay wax ku cunaysay ayey ku tuurtay markaasna maqasinkeedii ayey gashay. Carruurtii way ooyeen, markaas ayuu koodhadh-koodii inta uu u soo qaaday dibbadda u saaray. Waxa uu ka fakaray marka uu maktabadda tago inuu buuggii yaraaa ee waxyeelada ku saabsanaa akhristo. Waxa uu go'aansaday in aanu sidan ku noolankarin markaa uu u baahanyahay inuu cid mucaawino siisa raadsado.

Sidee ayey u egtahay?

Waxyeelada dareenku waxay dhacdaa marka qof uu isticmaalo kalmado uu kugu xukumayo, ama uu kugu cabsiinayo, ama uu dadka kaaga dhex saarayo ama uu wax kuugu dhimayo. Waxa ka mid ah:

- cayda iyo hoos u dhigga
- in lagugu qayliyo si joogta ah
- in lagu diido in aad asaxaabtaada iyo reerkaaga aragtid
- in laga maadsado diintaada iyo dhaqankaaga
- in la xukumo labiskaaga ama halka aad tagaysid ama cidda aad arkaysid (haddii aad qof weyn tahay)
- in dibbadda lagu diido ama waxdhigasho iyo shaqo lagaa horjoogsado
- in lagugu cabsiiyo in dalka lagaa saaro haddii aanad samayn sida qofku kaa rabo
- in lagugu cabsiiyo in wax lagu yeelo adiga ama qof kale
- in alaabtaada la burburiyo
- in lugu bajiyo sharaftaadana wax loo dhimo (taa waxaa ku jirta internetka)

Waxyeelada dareenka qaarkeed ayaa danbi ciqaa bleh ah. Waxaa ka mid ah: qofka in la daba galo, in waxyeelo lagu cabsiiyo, in telefoonka lagugu dhibo. In lagu cabsiiyo ilaa xad nafta la nacsiiyo. Waxyeelooyinka dareen oo kale danbi ciqaab leh ma aha, laakiin waa waxyeelo waxaana dhici karta inay sii xeeldheeraadaan.

Haddii ilmaha guriigiisa dareenkiisa wax lagu yeelo, waxa dhici karta in qoloda caruurta ilaalisaa ay ka kaxaysato, oo ilmaha waalidkii laga qaado.

‘Erayada iyo cibaarooyinka buuggan lagu isticmaalay.’



Waxyeelada dareenku waa wax khatar ah, dhaawaca ay gaysatana waa loo aayaa oo waqti dheer ayuu qaata inuu bogsado.

Xasaradda danbiga ah

Xasaradda danbiga ah waxaa ka mid ah in qofka la daba galo, taas oo ah danbi ciqaab leh. Waxay dhacdaa marka qofka la daba galo ilaa xad uu qofku u baqo nabad galyadiisa iyo ta reerkiisa. Waxa ka mid ah:

- in qofka la daawado ama la daba galo
- in qofku nabadgalyadiisa u cabsodo
- inaad u cabsoto nabadgalyada carruurtaada, reerkaga, asaxaabtaada iyo xayawaankaaga
- in tilifoonka lagugu soo celceliyo ama hadiyad aanad rabin lagu siiyo markaad qofka u sheegtay inay ku

Waxyeelo dhaqaale

Siday u eg tahay?

Waxyeelada dhaqaaluhu waxay dhacdaa marka qof uu isticmaalo lacag ama hanti si uu kuu xukumo ama uu kaaga faa'idaysto. Waxaa ka mida ah:

- in la qaato lacagtaada ama hantidaada adiga oon ogolaan
- in lacagtaada qofku qabsado oo kaa horjoogsadu in aad biilashadaa bixisid
- in lagugu dirqiyo inaad iibiso alaab anad u diyaar ahyn
- in lagaa horjoogsado lagacta reerka ee adiga iyo carruurtaadu aad u baahantihiiin

Waxyeelada dhaqaaluhu sida ay u badan tahay waa danbi ciqaab leh, taa waxa ku jira xaddista iyo dhacista. Dhaqaalaha waxyeelo waxa kale oo ku jira marka qof ka faa'idaysto qofka kale, sida in qofka dumarka ah laga dhaco ama laga musuqmaasuqo meherkeeda.



Ogaanshiyo darro

Ogaanshiyo darradu waxay dhacdaa marka qof reerkaaga ka mid ah oo kaa masuul ah daryeelkaaga uu ka soo bixiwaayo waajibka saaran.

Waxa ka mid ah:

- inaan lagu siin cunto fiican iyo dhar/hu wanaagsan
- inaan lagu siin hoy wanaagsan oo diiran
- inaan la daryeelin cafimaadkaaga oo aan daawooyinkaaga lagu siin
- in aan jidhkaaga la daryeelin
- in aan si fiican lagu xannaanayn (haddii aad u baahan tahay)

Waxa kale oo ka mid ah in cidla lagaaga tago adiga oo dhaawacan ama xanuun ku hayo.

Dadka is qabaa xaq waxa ay isugu leeyihiin in ay is daryeelaan. Dadka waaweyn wajib ayaa ka saaran ubadkooda iyo walidkooda.

Daryeel xumaanta ama darxumada qaarkeed waa danbi ciqaab leh dalkan Kanada, waxa ka mid ah in aad qofka la siin waayo waxyaaba uu xoogga ugu baahanyahay* iyo in ilmahaaga cidla lagaga tago*. Haddii ilmaha cidla lagaga tago dawladda ama dadka carruurta ilaaliya ayaa ilmaha gurigiisa ka kaxaysanaya oo ilmaha waalidkii ka qaadaysa.

Mararka qaarkood darxumadu waxa ay leedahay xanuun la mid ah waxyeelada jidhka.



Dagaalka dadka is ku xidhan/isu dhow

Dadka isu dhow dagaalkoodu waxa weeye dagaal ama waxyeelo kugu dhici karta:

- idinka oo is qaba ama wada nool
- iyadoo oo labada qof ee wada nooli ay isku mid yihiin ama kala jaad yihiin
- Xilli kasta dhici karta xataa marka ay dadku kala tagayaan amaba ay kale tageen

Dagaalka dadka isu dhawi isku mid ma wada aha. Mararka qaarkood, labada qof midkood ayaa doonaya in uu gacan sarreeyo oo uu qofka kale u taliyo. Islamarkaana awoodiisa oo dhan ayuu istacmaalayaa si uu u helo waxa uu doonayo. Waxa laga yaabaa in uu xukumo:

- dharkaaga ama huggaaga
- inaad dibadda u bixi kartid iyo halka aad qaban kartid
- cidda aad waqti la qaadan kartid
- xilliga aad reerkiina iyo asaxaabtaada la hadli kartid
- lacagta waxa aad ku iibsan kartid
- inaad wax dhiggan kartid ama aad shaqaysan kartid
- xilliga aad isu tagi kartaan ama sida aa isugu tagi kartaan

Waxyeelada noocaas ahi had iyo jeer way kasii dartaa oo way sii xeeldheeraataa. Had iyo goor waxay gaadhaa wax yeelo jidhka ah. Caafimaadka qofkana waxyeelo weyn ayey gaadhsiisaa, oo ay ka mid tahay qofka in uu ku dhaco argagax*(Post - traumatic stress disorder PTSD).*



Marar kale, labada qofba waxyeelo ayay isu gaystaan. Dadku inay iska hor yimaadaan waa wax caadi ah, hasa yeeshee waxa jirta si wanaagsan oo dhibta lagu xalliyo. Waxaa wanaagsan in dadku dhibaatooyinka haysta si fudud oo nabadi ku jirto u xaliyaan. Dhibtu marka ay badan tahay ma fududa in nabadgalyo iyo qabow lugu xallyo laakiin waa suuragali kartaa haddii lagu dadaalo.

Dadka qaarkood dalalkoodii waxay ku soo mareen dhibaatooyin badan oo ay ka mid yihiin dagaalo. Sidaa daraadeed waxa dhici karta in ay hayaan cudurro la yidhaahdo PTSD. Taas oo waxyeelo weyn gaadhsiin karta qofka iyo reerkiisaba. Haddii taasi dhacdo waxa qofka caawin kara in uu la kaashado dhakhtarada iyo dadka kala ee caawimada bixiya.

Haddii aad dareentid in aanad nabadgalyo ku sugnayn adiga iyo carruurtaadu, waxa kula gudboon in aad caawimo raadsatid.

Waxyeelada waayeelka



*“Inanteeduna ma rabto in ay hooyadeed
dad kale la sheekaysato.”*



Esha markii ay inanteedii ku qayli-
naysay jawaab umay celin. Waxa
ay ka yaabtay waxa ay inanteeda Anila
sidaa ugula dhaqanto. Kalcagalkii iyo
xushmayntii maxaa ku dhacay? Anila
hooyadeed dhabarka ayay hawl kaga
jabisay. Guriga oo dhan ayey u dirtay
inay nadiifiso. Waxa kale oo ay doonay-
saa in ay casho u kariso carruurteeda.
Iyaga oo aan qaddarinaynin cuntada
ayeeydood u diyaariso

Esha way ku faraxsanayd markii
ay Kanada timid. Hasa yeeshee iminka
waxay jeceshahay in ay dalkeedii
ku noqoto. Oo ay haydaartada iyo
hiifka inanteeda iyo ninkeeda Chanda
ka baxdo.

Dibadda uma baxdo; luqada way ku
ciilan tahay. Waxa ay jeceshahay inay
tagto xarunta Indo-Canadianka, laakiin
cid gaysa ma haysato. Inanteeduna
ma rabto in ay hooyadeed dad kale

la sheekaysato. Esha maanta waxay
ku tashatay inay saxibadeed Sakina
ka codsato inay u raacdo xarunta si
ay ula hadasho sama falaha (social
worker).



Sidee buu u egyahay?

Mararka qaarkood dadka ka masuulka ah dadka waayeelka ah (sida waalidkood, awoow iyo ayeeyooyindood, xiddidkood) waxyeelo ayay u gaystaan. Waxyeeladaas oo gaf ah marwaliba.

Haddii aad tahay qof waayeel ah oo waxyeelo haysato, qofka wax ku yeelaya in aad u baahan tahay sidaa daraadeed aad doonaysid in aan dhibaato ku iman, waxa la arkaa in aad ceeb u arktid in qof aad jeceshahay oo aad aamintay xumaan kuula badheedhay. Waxaa dhici karta qofka in dhib badani hayso oo uu isku buuqsan yahay. Haddii taasi jirto, qofku waa inuu caawimo raadsadaa ma aha inuu adiga cadhadiisa kugu la dhaco.


Waxa aad xaq u leedahay in xushmayn iyo qaddarin lagugula macaamilo. Haddii aad is leedahay ciddaadu waxyeelo ayay kugu haysaa, waxa kula gudboon in aad la hadashid cid aad ku kalsoon tahay si ay kuu caawiyaan. Ama dhakhtarkaaga si gooni ah ula hadal oo u sheeg dhibta ku haysata. Waxa kale oo aad akhrisan kartaa buug la yidhaahdo “Waxyeelada Wayeelku Waa khalad”.

<http://www.justice.gc.ca/eng/pi/fv-vf/pub/abus/eaw-mai/pdf/eaw-mai.pdf>



Darxumeynta Carruurta:



Hase ahaatee, iminka waxay Renee  isweydiisay sababta ay walaalkeed uga qabad weyday dilka Aadam iyo in ay walaakeeda ka baqaysay.

Tallaabada ayey Renee dedajisay markay ku soo dhawaatay xafiiska badaadinta carruuta, halkaas oo ay kulan arooryaad ku lahayd, ka dib markay aragtay walaalkeed Peter oo ul adag la dhacay wiilkiisa Adam oo kubadda cagta ka soo xaday wiil saaxiibkiis ah, gurigana keensaday. Dhacdinta ka dib Peter wuxuu yidhi: "Taasu darsi bay u noqon doontaa". Renee waxay damacday in ay walaalkeeda ka qabato usha uu la dhacayo wiilkiisa, hase ahaatee inta u Renee iska riixay ayuu ku yidhi: "Ar-rimahaaga ku ekow, waxaan ahay Aabo, waanan garanayaa waxaan sameynayo". In kastoo Renee bilo yar ay la nooleyd qoyska walaalkeed intii ay Kanada timid, haddana waxa galay dareen cabsi ah ooay ka qabto nabad gelyada wiilka Adam. Renee iyadoo qaylineysa waxay tidhi: Taa ma sameyn kartid oo waa darxumeyn, Adam na waxaad u geysan kartaa dhaawac ka badan nabo oo ah in Aadan adiga iyo qofnaba aaminin. Renee waxay rumeysan tahay in edbintaasi ay Kanada ka tahay dembi. Hase ahaatee, walaalkeed Peter waxa uu Renee ku ceebeeyey guriga oo qaraabe iyo saaxiiba ka buuxaan waxaanu yidhi:

Waxba kama ogid arrima dhabta ah ee ku saabsan qoyska, waayo weligaa carruur maad yeelan. Renee inta ay isku yax yaxday ayey dib u gaabsatay. Indhaheeda ilma iska buuxisay markii uu walaalkeed dilayey Adam. Hase ahaatee, iminka waxay Renee isweydiisay sababta ay walaalkeed uga qabad weyday dilka Adam iyo in ay walaalkeeda ka baqaysay, iyo sababta ay dumaashideed arrintaas uga aamusneyd; ma waxay is tidhi hadii ay arrintaas booliiska gaadhsiiso, malaha qoyskeeda ayey lumin doontaa? Renee markii ay guriga ka baxday waxay dareentay awood badan, waxa ayna go'aan satay in ay arrintan gaadhsiiso taliska si ay u badbaadiso inanka ay eadada u tahay, iyo in ay dhammaan qoyska gargaar u raadiso. Renee waxay og tahay in qoyska reerkeedu uu ka caddhoon doono arrintan ay qaban doonto – haddii ay qoyska walaalkeeda ku raacdo arrintan waxay ay noqon kartaa in la qariyo darxumeynta Adam. Renee waxay go'aansatay in ay u badheedho cadhada qoyskeeda, waayo waxaa wax walba kala weyn badbaadada Adam iyo in Adam loo sameeyo mustaqbal fiican.

Arrintani siday kuu la eg tahay?

Waalidnimadu marbay adag tahay. Haddi aad aaminsan tahay in ilmahaaga dhaqankiisu uu xunyahay ama yahay mid aan qadaris lahayn, daawadeedu maha dagaal, waayo taasi waxay ku keeni kartaa in aad ilmahaaga wax yeelo gaadhsiiso iyo in aad gasho dembiyo oo ay darxumeyntu ka mid tahay.

Haddi aad u baahato gargaar si aad u fahanto ama aad u toosiso dhaqanka ilmahaaga ama ilmahaaga ku gargaartid sida uu uga gudbi lahaa dhibaha culus, waano ka raadso saaxiib aad aaminsan tahay, dhakhtar, shaqaalee bulsho, waano dugsi ama macalin. Ma jiro wax jideenaya dagaal. Isla markaasna, waxaa badbaadinta ubadka ka mid ah qaanuunada dembiyada iyo gobolada & dagaanada si carruurta looga illaaliyo darxumo iyo dayacaad.

gobolada & dagaanada Kanada waxay leeyihiin qaanuuno sheegaya in qofkii aaminsan in uu og yahay darxumo haysata ilmo, in ay waajib ku tahay in uu arrintaas soo gaadhsiiyo mas'uuliyiinta. Tusaale ahaan, haddii ubadkaagu ku sugan yahay darxumeyn dagaal qoys, waxaa kula gudboon in aad gargaar u doontid. Waxaad gargaar ama waano ka raadsan kartaa hay'adda ilaalinta caruurta iyo hawlaha qoyska. Haddi aanad qaadin tallaabooyin aad ku badbaadin karto ubadkaaga, waxaad la kulmi kartaa faragellin ku saabsan arrimaha qoyskaga oo kaaga timaada booliiska ama hay'adda ilaalinta caruurta. Qawaaniintaasi waxay illaalinaysaa carruurta xataa haddii habka darxumeyntu ama daayacnimadu aysan aheyn mid dembi ah. Haddii aad dareensan tahay in aanad badbaadin karin ubadkaaga, wac booliiska.

Ubadka arka ama maqla dagaal:

Haddii aad tahay waalid oo lagu darxumeeyey, waxaa kugu adkaan karta ilaallinta ubad kaaga. Darxumadu waxay kaa qaadi kartaa awood aad ubadkaaga wax ugu qabatid. Waxaad dareemi kartaa godob ah in aanad ubadkaaga siin kari wixii ay u baahanyihiin.

Ubadka aad bay u dhibaysaa in ay arkaan ama maqlaan dagaal qoys xataa haddi aan dhaawac ka gaadhin dagaalkaas. Waxay u badan tahay in ay dareemaan baqdin ama waayaan xasiloonaan, dugsiga iyo meelaha bulsho-dhaqameedkana ku gaabiyaan. Waxa kale oo ay mooganaan karaan in ay tixgeliyaan naftooda ama adiga, ama axaa dhici karta in ay lakad ku noqdaan caruurta kale ama in iyaga la bahdilo. Marka ay guursadaan waxaa dhici karta in ay darxumeeyaan qoyskooda ama noqdaan qaar la darxumeeyo.

Haddii nolosha ubadkaagu ay ku sugan tahay dagaal qoys, taasi waxay noqon kartaa sabab ay hay'adda illaalinta ubadka ku dhaxgeli karto arrinta qoyska.

Gargaar waa jiraa. Marna waqti lumay ma aha in aad wax ka bedeshid arrimaha ubadkaaga.

Faahfaahin badan oo ku saabsan darxumeynta ubadka, arag *Darxumeynta Ubadku waa qalad: Maxaan ka qaban karraa?*



Ma joogaa mise waan tagaa?

Waxaa kugu adkaaneyna in aad joogtid ama ka baxdid xidhiidhka wadanoolaanshaha. Waxaad rumeysan kartaa in darxumeeyuhu mar uun isbedeli doono, bixitaankaaguna kugu abuuri karo baqdin in arrintu sii xumaato, ubadka lagaa qaado, aad ka warwarto waxa dadka kale kaa sheegi doonaan, ama aad ka yaxyaxdo in aad iska baxdo. Waxaa dhici karta in aad jeceshahay darxumeeyaha, ama aad dhaqaale ahaan u baahantahay, ama inaad ka baqayso in lagu musaafriyo haddi aad ka baxdid xidhiidhka wadanoolaanshaha. Lagama yaabo in aad og tahay meesha aad gargaar ka heli kartid.

Maxaa kula gudboon in aad qabatid?

Marka aad rabtid in aad go'aan ka gaadhid joogidda ama ka bixitaanka xidhiidhka wada noolaanshaha, la tasho qof aad ku kalsoon tahay in uu kugu gargaari karo go'aan kaaga. Marka aad go'aanka gaadhaysid, tixgeli qondobadan hoos ku tahan:

- Qofka ku darxumeeyey, marna ma kuugu hanjabay in uu ku dilo am uu dilo qof aad jeceshahay?
- Qofku ma kugula kacay dagaal galmo?
- Qofku ma ku hanjabay in uu isdilo ama ma isku dayey in uu isdilo
- Qofku ma yahay xakameeye ama hincase badne?
- Qofku ma diidan yahay in ay dhici karto in la kala baxo?
- Qofku hore ma isku dayey in uu ku ilaaleysto?
- Qofku khamriga aad ma u cabbaa ama ma qaataa maandooriye?
- Qofku ma leeyahay dembiyo hore?
- Qofku ubadkaaga ma u daran yahay?
- Qofku ma fara xumeeyey ubadkaaga?

- Qofku ma isticmaalay mindi si uu wax u yeelo naftaada ama ubadkaaga?
- Qofku dadka kale dagaal ma ku oogi jiray?
- Guriga qori ma yaalaa?
- Ma u baqaysaa nabadgelyada ubadkaaga?
- Ma u baqaysaa nabadgelyada xoolahaaga rabbaayadda ah?
- Ma ka baqaysaa in aad ka baxdid xidhiidhka wadanoolaanshaha?
- Saaxiibadaa ama xubnaha qoyskaagu ma kuu baqaan?
- Ma dareensan tahay awood li'i, maaxdumis ama walwal?

Haddii aad “haa” kaga jaabtid qaybo ka mid ah su'aalaha kor ku xusan, waxaad u baahantay taageero iyo gargaar, si kastaba go'aan kaagu ha ahaadee. Waa muhiim inaad tixgelisid baqdinahaaga iyo dareenkaaga. Kala hadal qof aad ku kalsoon tahay baqdimaha ku haya. Haddii aadan rabin inaad baqdimahaas la socod siisid qof aad taqaanid, u sheeg booliiska ama la hadal khadka-gargaarka. Dadkaasi waxay u darban yahiiin inay hagarli'i kuugu gargaaran. Haddii aad go'aan ku gaadhid in aad ku noolaato “shelterka” ama hoy gargaar, ubadkaaga waad soo kaxaysan kartaa. Shaqaalaha hoy gargaarku uma sheegi doonaan qofna halka aad ku sugan tahay, wayna ku ilaalin karaan kuguna gargaari karaan si aad go'aan u gaadhid.

Haddii aad ku adkeysato inaad ku jirto xidhiidhka wadanoolaanshaha, filaysana in darxumeyntu joogsato, hubi in qofka ku darxumeynayaa uu heegan u yahay inuu mas'uul ka noqdo falalkiisa. Qofkaasi waa inuu heegan u yahay in uu raadsado gargaar toosan si uu u barto in uu badelo sida uu u dhaqmo. Haddii ay maandooriyeyaaalku qayb ka yihiin dhaqan dagaaleedka qofkaas, waxa uu u baahanyay in uu raadsado gargaar la xidhiidha maandooriyeha iyo dhibaataadiisa si uu u joojiyo dagaalka. Dhaqan bedelku badanaa waxa uu qaataa waqti dheer. Waxaad u baahantay gargaar badan ilaa waqtiga arrintani socoto.

Waxaad u baahan tahay in aad sugtid sidii aad ku badbaadi lahayd. Sameyso hab badbaado. Bulso shaqaaleed ama sarkaal booliiska ah ayaa arrintaas kugu gargaari kara. Xataa haddi qofku uu isku dayo in uu isbedelo, mar kale ayuu dagaal oogi karaa. Sameyso taxan nambarada adeega deg-degga ah.

Ama joog ama ka bax xidhiidh wadanoolka, haddi ubadkaagu ay ku noolyihiin guriga darxumeyntu ay ka dhacday, waa inaad arrinta la socodsiiisa hay'adda badbaadada carruurta.

Carruurta maxay ku sugnaan doonaan haddi aad ka baxdid xidhiidka wadanoolaanshaha?

Haddii aad ka baxdid xidhiid darxumo leh, waxaad dalban kartaa in aad carruurtaada haysatid. Haddii aad isleedahay carruurtaadu khattar bay ku sugantahay, la xidhiidh booliiska kana dalbo in ay adiga iyo carruurtaada ku geeyaan guri gargaar(shelterka) ama meel kale oo aad ku badbaadi doonto.

Marka aad dareento nabadgelyo, la xidhiidh qareen kugu gargaara sidaad maxkammadda uga dalban lahayd haynta carruurta ama amar waalid haynta carruurta. Haddi aad la xidhiidhi karto afhayeen inta aanad ka bixin xidhiidhka wadanoolaanshaha, waxaa kuu fiican in aad si deg-deg ah u heshid talo sharci ah. Haddii ilmahaagu uu soo booqanayo waalidka kale, waxaad yeeli kartaa in aad qof xigta ah (Tusaale: awow/ayeeyo, ama xigto kale ama saaxiib) ilmaha la socdo marka uu ilmuhu u tegayo ama ka imanayo jguriga waalidka kale. Meela qaarkoodna dad ayaad u kiraysan kartaa ilmaha booqashadiisa goob joog ka noqda. Haddi aad ka warwarsantahay nabadgelyada ilmaha markii uu booqanayo waalidka kale, waxaad xaakinka weydiin kartaa in ay booqashadu noqoto mid goob joogahaan loo ilaaliyo. Marar dhif ahna xataa haddii uu goob joog la socdo booqashada ilmaha laakiin waalidka kale uu khatar u keeni karo ilmaha, Xaakinka ayaad weydiin karta in uu diido booqashooyinka oo dhan.

Halkan waxaad ka heli kartaa taxanka ama liiska adeega cadaaladda ee qoyska:

<http://www.justice.gc.ca/eng/pi/fcy-fea/lib-bib/tool-util/apps/fjis-rsgjf/brows-fure.asp>

Nabadgelyadaada iyo ta carruurtaadu ha ugu horeyso noloshaada, lacag la'i ha ugu nagaan meel khatar ah, hoy gargaar(shelterka) ayaad muddo kooban adiga iyo carruurtaadu kaalmo ka heli kartaan ilaa inta aad ka heleysaan kaalmo dheer, waxaana lagu la raadin karaa kalmo lacageed.

Carruurta waalidkood afduubo

Afhayeen u sheeg hadaad isleedahay waalidka kale ama qof kale ayaa damacsan in uu carruurtaada dalka ka saaro. Haddaad dalbatid, garsooruhu wuxuu amri karaa in baasaboorka ilmahaaga maxkammaddu hayso. Haddii carruurtaadu ku dhasheen Kanada, wac xafiiska Baasaboorka ee Kanada kharash la'i. Telefoonkoodu waa: 1-800-567-6868 or TTY services 1-866-255-7655, weydiina in ay magaca ilmahaaga ku qoraan liis si aad u ogaatid haddii qof isku dayo in uu ilamahaaga dalka ka saaro.

Badanaa carruurta waxaa qafaasha qof ilmuhu yaqaan, qafaashuhuna waa waalid.

Qafaalashada waalidku ilmaha qafaalo waxay dhacdaa marka waalid ilmaha qaato isaga oon xaq sharci ama fasax waalidka kale ka haysan. Waalid afduubka ilmo waa dembi Kanada, la ga reebo marka uu waalid ilmaha qaato si uu uga badbaadiyo khatar uu ku suganyahay.



Maxaa kula gudboon haddii aad ka baqdo in waalidka kale ilmahaaga afduubo?

- La xidhiidh qareen/afhayeen
- La xidhiidh booliiska degaankaaga
- Meel haboon ku keydi macluumaadka ilmahaaga ku saabsan
- Nuskhad ka reebo waalid heynta ama heshiishka aad waalidka kale la gashay si aad ilmaha mas'uul uga noqotid.
- Weydiiso xafiiska baasaboorka degaankaaga in magaca ilmahaaga lagu daro liiska illaalinta baasaboorada. Haddii carruurtaadu ay muwaadiniin ka yihiin dal kale, la xidhiidh safaaradda/qunsuliyadda dalkaas weydiisana in aysan carruurtaada siin basabooro.
- Bar ilmahaaga sida loo isticmaalo talefoonka, una sheeg sida ay u shaqayso qaybsashada korinta ilmahu sida ay u shaqeyn karto haddi uu yimaado kalabax ama furiin.
- Haddi ay xasiloon tahay xidhiidh fiican la sameyso waalidka kale iyo ilmaha xigtadiisa.
- Haddii ay jiraan, keydso sawiro iyo mac'luumaad kale oo ku saabsan khilaafkii qoyska horay idiin dhexmaray.

Haddi ilmahaaga la afduiubo:

- Deg-deg ula xidhiidh
- Dalka Kanada haddaad ka maqantahay ilmahaagana weydo la xidhiidh gargaarka Qunsiliyadda Dawladda Guud ee Kanada L/H 613-996-8885, kharash la'i meelaha laga helo.
- Haddii aad Kanada joogtidna, aaminsan tahayna in ilmahaagu dalka Kanada ka baxsanyahy, la xidhiidh gargaarka Qunsiliyadda Dawladda Guud ee Kanada L/H 1-800-387-3124.
- La xidhiidh hay'add baadhintaan ee gobolkaaga ama degmadaada, kana diiwaan geli in ilmahaagu maqanyahay.

Ilmahaagu hadduuna ahayn muwaadhin Kanada ah:

Qasab kugu maha in aad darxumeyn ku noolaatid. Haddii joogitaankaaga Kanada aad warwar ka qabtid, la tasho qof war sugan ku siin kara oo ka mid ah saraakiisha Hijrada iyo Muwaadhinimada Kanada, qareen ama shaqaale bulsho, ama xubin ka mid ah la taliyayaasha Guddiga Xeer-dejinta Socdaalka Kanada. Ogow, waxaad xaq u yeelan kartaa gargaar lacageed iyo gargaaryo kale haddii aad darxumeyn ku noolshahay. Hubi inaad hesho macluumaad lagu kalsoonyahay.

Haddi aad tahay qaxooti la aqbalay ama qof dalka Kanada si rasmi ah ugu nool, ka bixitaanka xidhiidhka wada noolaanshuhu saameyn xun kuma yeelan karo arrintaada.

Waxaad qaadann karto haddii aad ka baxdo xidhiidhka wadanoolaanshaha.

Marka lama filaan ku qabsado, deg-deg u bax. Ha u hakan alaab uruursi ee soco. Hase ahaatee, haddi aad waqti haysato, alaabtaada intii aad karto ka uruurso. Waxaad qaadann kartaa:

- Dukumentiga muhiimka ah sida shahaadooyinka dhalashada, kuwa caafimaadka, baasaboorada, xaashiyaha laanta socdaalka, kuwa carruur haynta, amarada maxkamadaha, tirsiyada daryeelka bulshada, lacag, kaadhahka amaahda iyo keydadka.
- Buuggaga jeegga, baanka iyo keydadka sugan
- Daawooyinkaaga
- Buugga aad talefoonada iyo ciwaanada ku kaydsatid.
- Furayaasha guriga
- Ruqsadda baabuur kaxaynta iyo furayaasha baabuurta
- Qalabka carruurta ku ciyaarto
- Dhar mudo idinku filan iyo
- Jawaahirka muhiimka ah

Haddii aad ka fakarayso in aad tagto, waxaa fiican in waxyaalaha aad u baahantay aad isku duwatid oo aad meel gaar ah ku keydsatid si aad deg-deg ugu qaadato markii aad u baahato.

Yaa ku gargaari kara?

Gargaar waad heli kartaa

Dad baa ku gargaari kara haddi aad ku sugan tahay darxumeyn. In kastoo aad ka daasho in aad sheekadaada wariso, hase ahaatee isku dey inaad hesho qof u nugul gargaarkaaga.

Qof aad taqaano haddii uu ku sugan yahay khatar, wac 9-1-1. Haddii degaankaagu lahayn gargaarka 9-1-1, wac booliiska nambarka deg-deg ah ee degmadaada. Booliiska waxaa la baray in ay gargaar kaaga fidiyaan wixii khatar ku gelinaaya. Booliiska waxaa lagu tababaray in ay ku siinyaan gargaar kaala baxsada wixii khatar ku gelinaya; isla markaasna waxay kuu gudbin karaan maamulka gargaarka dadka la darxumeeyo. Maamulka gargaarka dadka la darxumeeyo ama qareenkuba waxay kugu gargaari karaan in ay kaa baajiyaan eed sharci si aad uga badbaadid darxumeeyaha.

Haddaan arrin khatar ah ku haysan, waxaad wici kartaa rugta caafimaadka, gargaarka dadka la darxumeeyo, ururada bulshada, guri gargaar, ama booliiska si aad ugu tebiso darxumeynta aad ku sugan tahay. Waxa ay kugu gargaari karaan waxa kula gudboon in aad ku kacdid.

Marka aad la tashatid sarkaal booliiska ah, ama shaqaale bulsho ama qareen, waxaad weydiin kartaa in arrimahaaga sir laga dhigo.

Taxanaha hoos ku qoran waxaad ka heli kartaa dad ama kooxo kugu gargaari kara. macluumaad, taageero ama gargaar deg-deg ah. Taxanadu ama tilmaamuhu wey isbedli karaan, ee xusuusnaw in aad cusbaynaysiisid.



Ururada Bulshada

Ururo badan ee bulshadeed ayaa bixiya gargaaro badan, dhicina karta in ay hayaan qof ku dhageysta kaalana hadla waxyaalaha kula gudboon. Waxay kuu gudbin karaan qareen haddi aad u baahan tahay ama kuu gudbin karaan gargaaro kale sida gargaar lacageed. Qaar ka mid ah ururada bulshada ayaa dhici karta in ay afkaaga hooyo gargaar kuugu fidiyaan. Bulshada guud ama gargaarka qaxootiga ayaa ku siin kara macluumaad ama kuu gudbin kara gargaaro ku anfaca. Fiiri, gargaarka Diiwaanka hayaddaha Muwaadinamada iyo Dal-u-guurka dadka soo galeenka ah, l/h:

<http://www.servicesfornewcomers.cic.gc.ca/>

Dhakhtarka Qoyska ama kalkaaliyaha caarfimaadka guud

Dhakhtarkaaga qoys wuxuu kaala talin kara darxumeynta ku haysata. Waxay kaa gargaari karaan qoon jidheed ama qoon maskax ahaan ama meel kale ayey kuu diri karaan. Degaano badan ayaa leh gargaar talefoon oo 24 saac ah.

Wac dawladda gobolkaaga si aad u heshid gargaarada caafimaad ee bulshada, ama aad u heshid macluumaad, waano iyo in lagu gudbiyo shaqaale bulsho, talefoonkooda waxaad ka heli kartaa interneetka ama ka 24-saac ee gargaarka.

Saaxiibo, reerkaaga ama deriska

Gargaar waxaad ka heli kartaa oo kale qof aad aaminsan tahay. Dadku wey ku caawin karaan haddii ay ogyihiin waxa kugu dhacay.

Talefoonada Gargaarka

Waxaa jira talefoonno 24 saac ah oo aad wici karto adiga oon isa sheegin. Qofka kuu jawaabaa wuu kula talin karaa si aad u gaadhid go'aan nabagalyo adiga iyo carruurtaada kuu horseeda. Ka fiiri buuga talefoonada, meelna ku keydso nambaradaas haddii aad u baahatid mar kale. Meelaha kale ee aad gargaar ka heli karto waxaa ka mid ah:

Cusbitaalda

Haddi dhaawac adiga ama carruurtaada soo gaadhey ama aad u baahato gargaar darxumeyn. Wac dawladda gobolkaaga si aad u heshid gargaarada caafimaad ee bulshada, ama aad u heshid macluumaad, waano iyo in lagu guddiyo shaqaale bulsho, xataa haddii aanad ahayn muwaadhin Kanada, ama tahay qaxooti ama qof si rasmi ah u deggan Kanada.

Haddii aadan haysan dhalshada Kanada, waxaad weli heli kartaa xanaanada caafimaadka. Haddii aad sharci ahaan u joogto wadankaan, sida qaxootiga, qof si joogta u deggan ama qof la soo isboonsaray waxaa laga yaaba inaad u qalanto xanaanada caafimaadka oo bilaash ah ka dib sadax bilood marka aad hesho ceymiska caafimaadka gobolka ama territorial-ka. Dadka qaxootiga ahi waxay ka helaan xanaanada caafimaadka wasaaradda Dhalashada iyo Socdaalka Kanada. Soo booqdayaasha iyo dadka mudada gaaban joogayana waxay iibsan karaan ceymis caafimaad. Wixii su'aal ah ee ku saabsan ceymiska caafimaadka, waxaad ka eegi kartaa qadka internetka ee qeybta caafimaadka gobolka ama wac qeybta howlaha caafimaadka gobolka. Waxaad weli eegi kartaa qadka internetka ee wasaaradda Dhalashada iyo Socdaalka ee Kanada :www.cic.gc.ca.

Gargaarada sharciga ah

Qareen ama xafiis gargaar sharci oo ah bilaash.

Booliiska:

Saraakiil badan oo booliiska ah ayaa tababar u leh in ay ku gargaaraan. Wac 9-1-1 ama nambarka booliiska ee deg-degga ah.

Barnaamijada waano sharci ama macluumaadka

Bogga qeybta Cadaaladda Kanada ee dagaalka qoyska, l/h: :
<http://canada.justice.gc.ca/eng/pi/fv-vf/plei-vij/index.html>

Ururada Diimaha:

Waxaad la socodsiiin kartaa arrintaada.

Guri Gargaar:

Waxaad ka heli kartaa adiga iyo carruurtaaduba jiif nabad gelyo ah oo ku meel gaadh ah.

Gargaarka dadka la darxumeeyey

Wey ku gargaari karaan..eeg diwaanka dadka la darxumeeyey oo aad ka heli karto qaf afkaaga yaqaan si aad gargaar uga heshid, l/h: <http://canada.justice.gc.ca/eng/pi/pcvi-cpcv/vsd-rsv/index.html>

Muhiim Sir ka dhigo talefoonada aad gargaar ku weydiisanayso si aan qofka ku darxumeeyey u ogaan arrintaada.

Haddi saaxiib ama xigto kuu sheegto in la darxumeeyey:

Si fiican u dhageyso oo u sheeg in ay gargaar heli karaan cabsi la' i. Haddi arrintu khattar tahay wac 9-1-1.

Maxaa dhacaya haddii aad booliska wacdid?

U sheeg arrintaada, waayo tan iyo 1980s xeer illaliyaha guud ee Kanada waxa uu leeyahay hab gaar ah ay kugu gargaari karaan oo dhibka ku haysta ka dhiga mid dembi ah.

Booliiskku wuu xidhi karaa qofka ku darxumeeyey. Haddaad adiga iyo carrurtaadu baqaysaan weydiiso booliiska in ay kula socodsiiyaan goorta qofka ku darxumeeyey la sii daynayo, ama doono qof aad ku kalsoontahay inaad la joogto.



Maxaa dhacaya haddii askartu xukunto qofka waxyeelada kuu gaystay?

Haddii qof waxyeelo kuu gaystay uu qirto danbiga uu galay, xaakinka/qaadiga ayaa go'aan ka gaadhaya waxa lagu xukumayo. Xukunkaasi waxaa dhici karta in uu noqdo ganaax ama takhsiiir* ama in qofka la ilaaliyo.* Waxa kale oo dhici karta in qofka wax ku yeelay loo diro in uu dad caawin kara la hadlo.* Waxa kale oo dhici karta in jeel lagu xukumo. Inta aan qofka jeel loo dirin wuxuu xaakinku/qaadigu ka fiirsanayaa waxyaabo badan oo ay ka midyihiin dhawaaca qofku ku gaadhsiiyey inta uu la eg yahay iyo inuu danbi hore qofku galay.

Haddii cabsiyi ku hayso la socodsii qofka dawladda ka socda ee doonaya in qofka wax ku yeelay danbigiisa lagu qaado ama qofka dadka wax la yeelay cawiya.* Haddii qofka wax ku yeelay lagu xukumo in la ilaaliyo, xaakinka/qaadigu shuruud ayuu ku xidhayaa qofka inta aan la sii dayn.

Haddii qofka wax ku yeelay aanu danbigiisa qiran, sida ay u badan tahay maxkamad ayaa la saarayaa. Taas oo laga yaabo in ay muddo bilo ah qaadato. Adiguna markhaati ayaad ka noqonaysaa maxkamadda. Waxaa lagu dadaalayaa in lagu fududeeyo. Waxaa dhici karta in aad xaakinka/qaadiga kula hadasho filim qaadada ku xidhan maxkamadda. Taas oo kala baxsanaysa inaad qofkii ku dhibay makhsin la fadhiisatid. Maxkamadda marka aad imanaysid waxaa fiican in aad soo kaxaysatid dad ku gargaara. Qofka waxyeelada kuu gaystay haddii aanu qof difaaca haysanin, maxkamadda ayaa u qabanaysa qof. Taas oo looga dan leeyahay in lagaa badbaadiyo in qofkii wax ku yeelay wax ku su'aalo.*

Haddii qofka waxyeelada ku gaadhsiiyey danbi lagu helo, xaakinka/qaadiga ayaa goynaya waxa xukunkiisu yahay. Wuxuu xukunkaasi noqon karaa ganaax ama takhsiiir, in qofka la ilaaliyo muddo ama in qofka la xidho.

Xasuuso, qofna xaq uma laha in uu waxyeelo kuu gaysto

Nidaamka cadaaladda waxaa dhici karta inaad ka cabsootid, laakiin waxa aad ogaataa in loo sameeyay in dadka nabadgalyo loo helo. Waxaa jira dad badan oo kugu caawin kara inaad ka baxdid waxyeelada ku haysata. Waa la ogyahay in qof noloshan Kanada ku cusub uu waqti adag marayo, sida dhaqan cusub, dhaqaale xumaan ama warwar kaa haysta carruurtaada iyo mustaqbalkooda. Inaad caawimo raadsataa ma fududa, hasa yeeshee waxaa weeye waxa ugu fiican ee aad naftaada iyo carruurtaadaba u qaban kartid. Waxaad ogaataa in aad ikhtiyaar leedahay oo aanad ku qasbanayn inaad kusii jirto xidhiidh aad ku dulaysan tahay.

Haddii waxyeelo ku haysato waxaa lagugu tixgalinayaa inaad caawimo raadsatid. Taasi waa kuu suuragal, oogowna waxaad u qalantaa nolol nabadgalyo ku sugan.



Erayada ama cibaarooyinka buugan ku qoran

Fadlan ogow: Waxaa suuragal ah in sharaxaadahani ay kaa caawiso inaad fahanto weedhaha sharciyeed. Maaha sharaxaad sharciyeed. Wixii Sharaxaad sharciyeed ah ee waadhahani ku saabsan, waxaad kala tashan kartaa qarreen.

Weerar:

Weerarku waa danbi ciqaab leh oo dhacda marka qofku uu isticmaalo xoog ama uu kugu cabsiiyo inuu qof kale xoog ku isticmaalo. Muhiim ma aha inuu qofku si toos ah kuu soo abbaaray iyo in kale.

Shirka damaanadda

Wuxu dhacaa marka qofka la qabtay danbina lagu qaado. Xaakinka/qaadiga ayaa goynaya in qofka la sii daayo iyo in jeel la dhigo inta kiiskiisa la maqlaayo. Haddii la sii daayo qofka waxa dhici karta inuu Xaakinka/qaadiga shurruud qofka ku xidho. Waxa ka mid noqan karta in lagu xukumo inaanu u soo dhawaan qofkii dacweeyey.

Tuusista ilmaha

Ilmaha tuuristiisu waa danbi dalkan Kanada. Waxa ay dhacdaa marka ilmo toban jir ka yar si ula kac looga tago. Iyadoo taasi ay khatar galinayso nabadgalyadiisa ama caafimaadkiisa.

Hay'adda badbaadinta carruurta

Gobal kastaa wuxuu leeyahay hay'ad qaabilsan carruurta daryeelkooda oo baadha haddii dacwo ilmo ku saabsani soo gaadho. Magacyo kalena way leedahay hay'adu. Waxaa ka mid ah “sama falka ilmaha”, “caawimada ilmaha”, “badbaadinta dhalinyarta”.

Haddii ay hay'addu aragto in ilmuhu badbaadin u baahan yahay, waxay samayn karaan:

- reerka ilmaha in ay caawiyaan
- in ay ilmaha guriga ka kaxeeyaan muddo gaaban ama abidkiiba

Muqaalka kooban

Waxa weeye filim-qaadayal u gudbiya dadka muqaalkooda iyo hadalkooda maxkamadda iyaga oo aan la fadhiyin qolka.

Sir

Wax gaar ah.

Ogalaanshiyo

Micnihii waxa weeye in aad yeesho. Laakiin sharcigu macne kale ayay u leedahay ogalaanshiyaha. Waa inaad ogolaataa arinka adiga oo aan lugugu dirqiyin, isla markaana haysta macluumaad kugu filan oo aad go'aan wanaagsan ku gaadhi kartid. Waxaa loo soo qaadan karaa in aanu qaanuunku ogalyn in uu ilmo ogolaado in uu xidhiidh galmo la yeesho qof weyn. Qof kooma ku jiraa ama hurdaana ma yeeli karo sidoo kale. Aamuska iyo ogalaanshiyuhu isku mid ma aha.

La talin

Waxa ay dhacdaa marka aad la kulanto marar badan qof aqoon badan leh, si uu kaga caawiyo arimo culus oo aad maraysid. Qofkaas oo aad kaligaa la kulmi kartid ama aad laba qof isku raaci kartaan, amase dad badan.

Qodobka danbi

Waxa weeye qanuunka caddaynaya waxyaabaha danbiga ah dalkan Kanada.

Xadgudubka danbiga ah

Waxa weeye marka qanuun ama sharci la jabiyo.



Laynka masiibada kaa caawiya

Waxa weeye khad bilaash ah oo la waci karo haddii dhibi kugu dhacdo ama aad macluamad degdeg ah u baahan tahay. Marka aad laynkaa wacdid magacaaga iyo telefoonkaaga ma aha inaad bixisid. Waxaa kula hadlaya dad ku dhagaysanaya ka dibna kuu diraya meelo kale oo lagugu caawin karo.

Xeer ilaaliye

Waxa weeye ninka qaanuunka yaqaan ee dawladda matala. Arrinta ayuu xaakinka/qaadiga hor dhigaa markaa qaanuun la jabiyo. Adiga kuma matalo ee wuxuu ku hadlaa dadweynaha guud magacooda.

Iswaydiin Kulul

Waa wadiiqo lagu isticmaalo sharciga Kanada marka dadku maxkamadda marayaan. Qolo waliba markhaatiga qoloda kale ayey imtixaan marisaa oo ay su'aalo baadhis ah waydiisaa.

Dhaqan ka yaab

Waxa weeye dareenka kali ahaanta ama warwerka kugu dhici kara marka aad dal cusub iyo dhaqan aanad aqoon soo dhexgashid. Waxa laga yabaa in aad ka qalootid afka, cuntada, cimilada ana jawiga, shanqadha agagaarkaaga ka baxaysa, ama dhaqanka iyo sida uu carruurtaada u baddali doona. Sida ay u badan tahay dareenkaasi wuu iska tagaa marka aad dalka la qabsatid.

Haynta ilmaha

Ilmaha waxa ka masuul ah sharciyan waalidka haya. Go'aannada waaweyn oo dhan ee ku saabsan ilmaha korintiisa ama wax baristiisa walidkaas ayaa gooya. Haddii ay labada waalid ku heshiiyan in ay ilmaha wada korsadaanna way wadaagaan wax walba oo ilmaha ku saabsan. Mararka qaarkood maxkamadaha ayaa gooyo sida ugu fiican ee ilmaha dantiisu ku jirto.

Khiyaamada meherka

Dhaqannada qaarkood waxa caado u ah in ay gabadhu keento lacag ama hanti kale oo ay reerka ku kurdhiso. Haddii uu ninku gabadha u guursadu inuu lacagteeda iyo hantideeda qaato oo aanu iyada rabin, ka bacdi markuu lacagta helona uu furo ama uu guurkii ka noqdo waa Khiyaamo.

Waajibka daryeelka

Waxa ay tahay marka ay qof masuuliyad kaa saarantahay daryeelka iyo xannanaynta qof kale. Waxa ka mid ah waalidka in ay masuuliyada ka saarantahay carruurtooda yaryar. Dadka is qabaana inay xaq isku leeyihiin oo ay tahay in ay is daryelaan.

Haddii aad bixin kariwaydo waxa daruuriga ah

Waa danbi in waalidka ama qofka ilmaha 16 jir ka yar ka masuulka ahi uu ilmaha siin waayo waxa yaabaha ay ka mid yihiin cuntada, hoyga, daryeelka cafimaadkiisa, tacliintiisa iyo wax kasta oo uu ilmuhu u baahan yahay si uu u noolado.

Ganaax lacageed ama takhsiir

Waa xukun maxkamadeed oo ah qofkii danbi lugu qaaday oo lugu helay inuu lacag bixiyo.

Jaalle Gaar

Waxa weeye dadka cilaaqad khaasi ka dhaxayso sida dadka is qaba ama saaxiibtinimo ku wada socda. Waxaa kale oo ka mid noqon kara dadka carruurta isu leh.

Xafiiska gargaarka sharciga

Xafiiskaasi wuxu xagga qaanuunka ka gargaaraa dadka aan hanti badan haysan ee aan la kaashan karin qof qanuun yaqaan ah in la caawiyo mooyiye

Damaanad nabadgalyo

Haddii aad nabad galyadaada u cabsoonaysid waxaa aad heli kartaa damaanad. Taas oo shuruud ku xidhaysa qofka waxyeelada kuu gaystay. Waxa dhici karta in loo diido in uu kula soo xidhiidho. Haddii uu shuruuda maxkamaddu ku xidhay ka soo bixi waayo oo uu wali ku dhibo waxa dhici karta



in booliisku qabato. Haddii aad u baahan tahay inaad cid kale kala tashashid sida aad ku heli kartid damaanaddaa waxa aad la hadashaa qof sharciga yaqaan.

Argagaxa ka yimaada isku buuqa

Waxa weeye xanuun dhimirka ama casaabta ku dhaca marka qofku shil maro oo uu dabadeedna isku buuqo. Waxaa shilka ka mid ah dagaalka, qofka in la dhaawaco ama inuu qofku arko masiibooyin kale oo dabiici ah sida dhul gariirka. Waxa dhacda in qofku ilaawi waayo xanuunkaa uu soo maray taasina ka dhabqiso noloshiisa caadiga ah.

Dibad ku ilaalinta

Waa xukun maxkamadeed oo qofka u cadaynaya sida ay maxkamaddu ka rabto inuu u dhaqmo.

Ilaalinta sharci

Waa xukun madani ah oo loogu talagalay in qofka logu ilaaliyo. Gobolada badidoodu way bixiyaan. Waxaana laga yabaa inuu qofku u baahdo in uu qaato si uu u hubiyo inuu jiro xidhiidh qofka wax yeelaya.

Xukun

Haddii qof danbi lagu helo, xaakinka/qaadinga ayaa goynay waxa xukinkiisu ama ciqaabtiisu tahay. Xukunkaas oo noqon kara xadhig ama takhsiir

Weerarka Galmo

Weerarka galmadu waa nooc ka mid ah xiriir galmo ama taabasho oo lala yeesho qofkale iyadoo aan oggolaansho laga haysan. Weerarka galmadu wuxuu noqon karaa laga bilaabo salaaxid ilaa galmo la isku khasbay. Qofina oggolaansho sax ah ma bixin karo haddii markii horeba oggolaanshaha la isku khasbay, ama la oggolaaday cabsi iyo khiyaano darteed. Aamusnaantu maaha oggolaansho. Qof hurdo dheer ku jira ama xiskiisu aanu dhammayn oggolaansho ma bixin karo. Da'da loo oggol yahay inay sameeyeen galmo waa 16 jirada, laakiin waxaa jira waxyaalo ka baxsan haddii qofku da' ahaan u dhaw yahay ilmaha uu u galmooday.

Waxyeelada qofka aad wada joogtaan/isqabtaan qodobada ku saabsan

Dalkan Kanada ururada booliisku waxay soo saareen qodobo ay tahay in ay booliisku raacaan marka ay la kulmaan waxyeelada noocaas ah. Ujeedadu waxay tahay in ay askartu haddii ay arkaan sharcigii ku saabsanaa arinka in la jabiyeey inay qofka dabniilaha ah qabtaan, xataa haddii qofka wax la yeelay anuu codsan.

Isdhaafsiga kormeerka ubadka

Haddii aanay waalidku wada noolayn, ilmuhu wuxuu u baahan yahay inuu labada waalidba arko. Markaa is dhaafsigu wuxuu dhici markii ilmuhu waalid ka tagayo midna u tagayo. Mararka qaarkood waxa jooga qof kale oo kormeere ah. Wuxu u joogaa inuu hubiyo in aan dhibaato gaadhin ilmaha ama labada qof ee dhalay midna. Qofku wuxuu xoojiynayaa nabadgalyada.

Daryeelka qofka darxumaysan

Waxa jira barnaamijyo lagu caawiyo dadka darxumooday. Waxa ay ka jawaabaan hadii qofku su'aalo hayo ama uu ka walaacsan yahay nabadgalyadiisa. Gobal waliba wuu leeyahay barnaamijyadaa.



Xusus



A large, vertically oriented rectangular area with rounded corners, filled with horizontal lines for writing. The lines are evenly spaced and extend across the width of the page. The background of this area is a light beige color, contrasting with the darker orange and yellow background of the page.



Sawirrada Jaldiga iyo jaantuska buugga ku qoran waxaa iska leh
The Bytown Group

Wadnaha iyo dhibcaha Illinta

Calaamada “x” ee la dhigay meesha u dhaxaysa sawirka wadnaha iyo illinta hooraysaa waxay isku xirtaa sidoo kalena tilmaamaysaa xiriirka ka dhexeeya rajada, kalgacalka iyo taageerada (wadnuhu) wuxuu tilmaamayaa xanuunka iyo dhibaata ay waxyeeladu leedahay (illinta hooraysa). Calaamada “x” waxay u taagan tahay xagtimaha ay waxyeeladu keento, sidoo kale waxay u taagan tahay dadaalada lagu ciribtirayo qalalaasaha iyo waxyeelada.



ABUSE IS WRONG IN ANY LANGUAGE

La maltraitance est inacceptable peu importe la langue

Waxyeeladu waa khalad luqad walba

El abuso es condenable en cualquier idioma

Жестокое обращение недопустимо на любом языке

학대는 언어를 막론하고 그릇된 것입니다

بدسلوکی کسی بھی زبان میں غلط ہے

بد رفتاری در هر زبان غلط است

தூர்பிரயோகம் என்பது எந்த மொழியிலும் தவறுதான்

إساءة المعاملة مرفوضة في جميع اللغات

虐待是有悖文明的惡行

दुर्विहार विषे ही ब्रह्मा विंच गलत है।